

Folkpartiet: waa xisbiga dalka Iswiidan ugu fikrad ballaaran

Information & Fakta

Xisbiga Folkpartiet waa xisbiga dalka Iswiidan ugu fikrad ballaaran. Aydhiiyoolojiyadayda, fikrada ballaaran, waxay ku salaysan tahay in ruux kasto u leeyahay qiimo oo aanan loo soo xadgudbin karin. Ujeedada siyaasadda xisbiga Folkpartiet ayaa waxay tahay in qof kasto u helo xuriyad iyo awood uu riyadiisa ku rumeeyo. Anagu, waxaanu aaminsannahay awooda garashada iyo damiirka aadenaha.

Mustaqbilkayga

Doorashada sannadkaan waa doorasho lug ku leh mustaqbilka dalka Iswiidan. Dalka Iswiidan wuxuu u baahan yahay awooda tartanka ganacsiga iyo mustaqbil lagu kalsoon yahay. Anagu waxaan siyaasadayda ku tilmaami karnaa saddex ereyo, kuwaaso kala ah: Aqoon-Shaqo – Badbaadin. Waxay taasi ku tusinaysaa sida anagu an dalkayga ugu dhigi karno dalka adduunweynaha ugu guul badan dhinaca tartanka ganacsiga adduunka.

Aqoonta

Waxaanu doonayna in an hirgelinno damaanada awooda akhriska-qorida-xisaabinta markii carruurta ay dhiganayaan dugsiyada biloowga-hoose-dhexe, iyo in aanu kordhinno muruqgelinta arrimaha aqoonta iyo helida shahadada. Waa in la ciribtira falalka gardarrada, dirirka iyo xoog-muquuniska ee ka dhaca dugsiyada. Sidaas awgeed, waxaanu doonayna in macallimiinta aanu siinno awood dheeraad ah, oona hirgelinno qiimeynta asluubta. Waxaan kalo doonayna in aanu sare u qaadno hawlaha cilmibaarista iyo waxbarashada heerarka sare.

Shaqada

Fursada shaqohelida waxaa la kordhin karaa iyadoo la kordhiyo aqoonta, iyo iyado aqoontaas lagu rogo fikradaha shirkadaha. Waa in dadweynaha lagu dhiirrigeliyaa dhisida shirkadaha, arrimahaasna loo fududeeya, canshuurta-na hoos loogu dhiga. Qofka ku nool kaalmo-dhaqaaleedka bulshada waa in laga dhaadhaaciiyaa in shaqaysashada ay maslaxad ugu jirto, sidaas awgeed waa in canshuurta hoos loo dhigo, sida canshuurta loo yaqaanno "jobbavdrag" taaso kuwa ugu daqliga hooseeyo ay ka faa'iideysan karaan.

Badbaadinta

Shaqada shirkadaha gaar ahaanta loo leeyahay ayaa horumarka dhaqaalaha badbaadin karaan. Kordhinta lacagta canshuurta waxay keenta horumarka daryeelka caafimaadka iyo xannaanada wayeelada. Waxaa hoos loo dhigi doona safafka dhaadheer ee imminka loogu jiro helida daryeelka caafimaadka, waxaana dib loo habayn karaa damaanada daryeelka caafimaadka, bukaanku waa innuu hela fursad u ku doorto takhtarka iyo isbitaalka u doonaayo. Waayeelada bulshodayda ku nool waa in dhammaantood ay helaan damaanada xanaanada waayeelada, damaanad lagu helo caawinaada loo baahan yahay. Waayeelka aan hoy laga siin hoyga waayeelada, waa in lacag gacanta laga saara, taaso u suurtagelin doonto iibsashada adeegga waayeelka daruuriga u ah. Waa in dambifalka loola dagaalama. Waa in la kordhiyaa tirada booliska, teeda kale waa in lagu dhaqaaqo

baaritaanka dambifalka dhammaantood. Boliiska waa in la siiya awood iyo qalab ay hab firfircoon u la dagaalamaan dambifalka.

Midaynta bulshooyinka

Dad tiradooda badan ee dalka Iswiidan ku nool ayaa laga fogaayaa awooda shaqaysashada, wadajirka iyo bulshada ba, taaso u sabab ah qollada ay ka tirsan yihiin. Waa falal maalinba maalinta ku xigta sii kordhaysa. Hawlaha midaynta bulshada dalka Iswiidan waxaa lagu horumarin karaa iyadoo la kordhiyo shaqo-helida, tirda dugsiyada wanaagsan, xaafadaha badbaadinta leh iyo iyadoo weerar lagu qaaqo falalka takoorka. Anaga oo ah kuwa leh fikradaha ballaaran waxaan dagaal ku qaadi doona falalka gooni u soocida. Waxaan adeegsan doona shaqo, bixinta damanada horumarka loogu talaggalay dadka shaqaysan karo, damaanada helida aqoonta ee dugsiyada, anagoo mudnaanta koowaad siin doono luqada iswiidishka. Waxaan hab culculus dagaal ku qaadi doona falalka takoorka. Teeda kale, waxaan saddex jibaar kordhin doona tirada booliska ka hawl galaa xaafadaha shisheeyaha ay u badan yihiin. Anagu waxaan aaminsannahay in aqoonta af iswiidishka lagamaarmaan u tahay qofka damacsan innuu codsado jinsiyada dalka Iswiidan.

Midnimada loo wada dhan yahay

Xisbiga Folkpartiet waa xisbi caalami ah. Waxaan oggolnahay adduun aanan xad lahayn. Waxaanu doonayna in Isbahaysiga Yurub uu hab firfircoon isugu mashquuliyoo arrimo aanan dal gaar ah ku salaysnayn. Waxaan doonayna in an horumarinno ganacsiga madaxabannaan iyo hawlaha samafalka ba. Nabadda waxaa lagu abuura iyadoo la kordhiyo wadashaqaynta iyo is-afgarashada wanaagsan. Aad iyo aad ayee muhim u tahay in dalka Iswiidan u lee yahay siyaasad dibadeed ee firfircoon. Waa in annu marna ka amuusin dhacdoonka xadgudubka ah. Taageersiinta hawlaha dimuqratiyada iyo xuquuqda aadenaha waa in mudnanta koowaad laga siiya siyaasadda samafalka.

Wada-Simida

Waa in sare loo qaada arrimaha wada-simida. Maanta ragga iyo dumarka isku shuruud ma aha, isku fursad-na ma aha, siyaabo kala duwan-na waa loo qaabiila. Labo iyo tobbankii sano ee ugu danbeeyay waxba laga ma qaban mushaharrada kala duwan ee dumarka iyo ragga. Waa arrin aanan marna loo dulqaadan karin.



Folkpartiet

www.folkpartiet.se

020-53 53 53